

# Barnaamijka Nafaqada Suuqa Beeraleyda Da'da Weyn Foomka Wakiilashada

Magaca qofka da'da weyn: \_\_\_\_\_

Taariikhda dhalashada: \_\_\_\_\_

Cinwaanka: \_\_\_\_\_

Magaalada: \_\_\_\_\_ Summada Degaanka: \_\_\_\_\_ Degmada: \_\_\_\_\_

Telefoonka: \_\_\_\_\_

Barnaamijka Nafaqada Suuqa Beeraleyda ee Waayeellada (SFMNP) ayaa wuxuu dadka waayeellada ah ee uu dakhligooda hooseeya siiyaa khudaar iyo miro markaasi la soo gurey (darey ah) iyada oo uu yoolku yahay sii wanaajinta xaaladda caafimaadkooda iyo nafaqada. Wuxuu kaloo taageeraa beerashada degaanka iyadoo la kordhinayo isticmaalka suuqyada beeraleyda iyo miisaska wadadda dhinaceeda la dhigto.

Dadka da'da weyn waxaa lagu dhiirrigelinayaa in ay noqdaan ka-qaybgalayaal firfircoon, wax ku beddelanaya dheefahooda oo dooranaya waxsoosaarka cusub ee beeraha oo ay iibsan doonnaan. Haddii qofka da'da weyn uusan awoodin in uu si buuxda uga qaybqaato qayb kasta oo ka mid ah barnaamijka oo sabab u ah naafonimo ama gaadiid la'aan, waxay ku magacaabi karaan foomkan wakiilashada qof ka wakiil ah oo uga qaybgalaya.

Magaca wakiilka: \_\_\_\_\_

Cinwaanka: \_\_\_\_\_

Magaalada: \_\_\_\_\_ Summada Degaanka: \_\_\_\_\_ Degmada: \_\_\_\_\_

Telefoonka: \_\_\_\_\_

**Marka aad foomkan saxiixdo, waxaad u magacaabeysaa wakiilka kor ku magacaaban in uu kugu metelo danahaaga barnaamijka SFMNP. Tani waxaa ka mid noqon kara saxiixidda dhaarta qoraalka ah ee xaq-u-yeelashada, in dheefaha la siiyo, helidda waxbarashada nafaqada, iyo wax ku beddelashada dheefaha.**

\_\_\_\_\_  
Saxiixa Ka-qaybgalaha Qofka Da'da Weyn

\_\_\_\_\_  
Taariikhda

Haddii codsadhaha/ka-qaybgalaha da'da weyn uusan awoodi in uu saxiixdo oo uuna leeyahay Awoodda Qareenka ee Waarta oo dhaqangal ah, fadlan ku soo lifaaq nuqulka DPOA dokumentigan.

Iyadoo la raacayo sharciga xuquuqda madaniga ah ee federaalka iyo siyaasadaha iyo xeernimaadyada xuquuqda madaniga ah Waaxda Beeraha ee Mareykanka, hay'addan waxaa ka mamnuuc ah takoorka ku saleysan isirka, midabka, qofka asal ahaan dalka aad ka soo jeedo, jinsiga (oo ay ku jiraan aqoonsiga lab iyo dheddig iyo dookha galmo), naafonimo, da'da, ama aargoosiga ama aar-gudashada hawlaha xuquuqda madaniga ee hore.

Macluumaadka barnaamijka waxaa lagu heli karaa luuqado kale oo aanan ahayn Af-Ingiriisi. Shakhsiyaadka naafada ah ee u baahan habab kale oo isgaarsiineed si ay u helaan barnaamij (t.a., Braille, daabacaad weyn, cajalad maqal ah, Luuqadda Meedaarta Mareykanka), waa in ay la xiriiiraan gobolka ka mas'uulka ah ama hay'adda maxalliga ah ee maamusha barnaamijka ama Xarunta TARGET ee USDA (202) 720-2600 (cod iyo TTY) ama USDA kala xiriir Adeegyada War-lalinta Federaalka (800) 877-8339.

Si uu u soo gudbiyo cabashada takoorka barnaamijka, Qofka cabashada soo gudbinaya waa in uu buuxiyaa Foomka AD-3027, Foomka Cabashada Takoorka ee barnaamijka USDA kaas oo laga heli karo barta internet-ka:

<https://www.usda.gov/sites/default/files/documents/ad-3027.pdf>, xafiis kastoo ay USDA leedahay, iyadoo la wacayo (866) 632-9992, ama la qorayo warqad ku socota USDA. Warqadda waa in ay ku qoran yihiin magaca qofka cabashada soo gudbinaya, cinwaanka, lambarka telefoonka, iyo sharraxaadda qoraalka ah ee tallaabada takoorka lagu eedeeyay oo si fiican u faahfaahsan si loogu wargeliyo Kaaliyaha Xoghayaha Xuquuqda Madaniga (ASCR) dabciga iyo taariikhda xadgudubka xuquuqaha madaniga ah ee lagu soo eedeeyay. Foomka AD-3027 ee la buuxiyay ama warqadda waa in loogu gudbiyaa USDA **boostada**: U.S. Department of Agriculture, Office of the Assistant Secretary for Civil Rights, 1400 Independence Avenue, SW, Washington, D.C. 20250-9410; ama **fakis**: (833) 256-1665 ama (202) 690-7442; ama **email ahaan**: [Program.Intake@usda.gov](mailto:Program.Intake@usda.gov).

Hay'adan waxaa ay bixisaa fursad loo siman yahay.